IIB MAGALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 19ka Luulyo 1984 L. 1 R 7

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

## QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 22 ee 24 Juunyo 1984, Abuurid da Golaha Sare ee Daryeelka Hooyada iyo Carruurta. Bogga 476

SHARCI L. 23 ee 24 Juunyo 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci Lam. 4 ee 18.5.84 kuna saabsanaa Dib u habeynta Sharci lam. 4, 13ka 4.1983: Joojinta Qaadka. » 481

SHARCI L. 24 ee 24 Juunyo 1984, U rogid Sharci Xeer-Sharci Lam. 6 ee 18 Maajo 1984, kuna saabsanaa Baabi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 482

SHARCI L. 25 ee 24 Juunyo 1984, U rogid Sharci Xeer-Sharci Lam. 5 ee 18.5.84, Dembiyada Mukhaddaraadka. » 483

## QAYBTA LABAAD

W. M.

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.


| | | |
|---|---|---|
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Caasha Maxamed Axmed L. 183 | » | 484 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Xasan Maxamed Siyaad L. 184 | » | 485 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Ismaaciil Cabdi Xaad L. 185 | » | 486 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdulle Jim caale L. 186 | » | 487 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Cali Guure Cali L. 187 | » | 488 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 26-4-82, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cabdi Xasan L-188 | » | 489 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO, 28-11-82, Naa do Dhul Jaalle Warshadda Gaaska Soomaaliyeed L. 189 | » | 490 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 30-11-82, Naa do Dhul Jaalle Maxamed Axmed Sa ciid L. 190 | » | 491 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 30-11-82, Naa do Dhul Jaalle Yuusuf Hilowle Axmed L. 191 | » | 492 |
| DAWLADDA H. MUQDISHO 30-11-82, Naa do Dhul Jaalle Saynab Maxamuud Cu mar L. 192 | » | 493 |

DAWLADDA H. MUQDISHO 30.11.82, Naa do Dhul Jaalle Xaawo Nuur Cismaan L. 193 » 494

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Naa do Dhul Jaalle Xuseen Xaaji Xasan L. 194 » 495

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Naa do Dhul Jaalle Cabdi Cismaa nGurye L. 195 » 496

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Naa do Dhul Jaalle Cali Shariif Maxamed L. 196 » 497

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Naa do Dhul Jaalle Yuusuf Cismaan Gurey L. 197 » 498

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Naa do Dhul Jaalle Xaaji Yuusuf Cusmaan L. 198 » 499

DAWLADDA H. MUQDISHO 7.12.82, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Xasan Cali L. 199 » 500

DAWLADDA H. MUQDISHO 7.12.82, Bed. Naado Dhul Jaalle Hindiya Xaaji Xu seen L. 200 » 501

DAWLADDA H. MUQDISHO 11.12.82, Bed. Naado Dhul Jaalle Khadiija Saalax Cabdalla L. 201 » 502

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.7.84, Lumid Jeeg. Lam. 061508 ku qoran Cabdirisaaq Guuleed Jaamac L. 204 » 503

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.7.84, Lumid Jeeg War. L. 061509 k uqoran Cabdirisaaq Guuleed Jaamac L. 205 » 504

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.7.84, Lumid Jeeg War. L. 681573 ku qoran

MAXKAMADDA G· BANAADIR, 14·7·84, Lumid Jeeg War· L· 074121 ku qoran Daahir Calasow Hiraabe L. 207 » 506

MAXKAMADDA G· BANAADIR, 14·7·84, Lumid Jeeg War· Lam. 074122 ku qoran Daahir Calasow Hiraabe L· 208 » 507

MAXKAMADDA G. BANAADIR· 9·7·84, Lumid Buug Kayd L. 23877 ku qoran Sahra Yuusuf Axmed L· 209 » 508

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 9.6.84 Lumid Jeeg War· L. 651226 ku qoran Axmed Barkhadle Cumar L· 208 » 509

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.84, Lumid Jeeg War. L 120236 ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed L·209 » 510

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.84, LumidJeeg War· L. 714925 ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed L· 210 » 511

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.84, Lumid Jeeg War. L. 13250 ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed L. 211 » 512

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.84, Lumid Jeeg War. L· 13249 ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed L· 212 » 513

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 17 7 84 Lumid Jeeg Wareega L 4169 ku qoran Muuse Warsame Xasan L 213 » 514

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 17 7 84 Lumid J Wareega L 13018 ku qoran Muuse Warsame Xasan L 214 » 515

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 17 7 84 Lumid J Wareega L 17841 ku qoran Muuse Warsame Xasan L 215 » 516

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 17 7 84 Lumid J Wareega L 648675 ku

## QAYBTA KOOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 22, taariikh 24 Juunyo 1984, Abuuridda Golaha Sare ee Daryeelka Hooyada iyo Carruurta.

### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:e

### Qod. 1aad

### (Abuuridda Golaha)

Waxaa la abuuray Gole Sare oo lagu magacaabay Golaha Sare ee Daryeelka Hooyada iyo Carruurta oo hoos yimaada Madaxtooada Jamhuuriadda Dimoqraadiga Soomaali ya, wuxuuna qabanayaa xilalka iyo hawlaha ku tilmaa man Sharcigan.

### Qod. 2aad

### (Xubnaha Golaha)

Goluhu waxa uu ka koobanyahay Xubnaha soo socda:

1. Madaxweynaha JDS ama qof wakiil ka-ah Guddoomiye;
2. Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka Xubin;
3. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Xubin;
4. Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo A. Bulshada Xubin;
5. Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo A. Diinta Xubin;

6. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Xubin;

7. Guddoomiyaha Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed Xubin;

8. Guddoomiyaha Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed Xubin;

9. Sheekh Caalim ah xagga Diinta Islaamka Xubin;

10. Laba muwaadin oo ku caan baxay dareenka dar yeelka bulshada Xubin;

11. Xoghayaha Xoghaynta Barnaamijyada Hooyada iyo carruurta Xoghaye.

Qod. 3aad

(Xoghaynta)

Goluhu wuxuu yeelanayaa Xoghayn fulineed oo joogto ah oo lagu magacaabo Xoghaynta Barnaamijya da Hooyada iyo Carruurta.

Qod. 4aad

(Waajibaadka Golaha)

Goluhu wuxuu qabanayaa xilalka iyo hawlaha soo socda:

1. Dersidda iyo talo ka soo jeedinta siyaasadda Daw ladda iyo qorshaha Guud ee Daryeelka Hooyada iyo Carruurta.
2. Dejinta tabaha iyo barnaamijyada lagu fulinayo Qorshaha Guud;

3. Soojeedinta talooyinka sharci, xeerarka iyo wixii nidaam ah oo dammaanad qaadaya xuquuqda Hooya da iyo Carrruurta;

4. Ka qayb qaadashada iyo gacan ka geysashada ji heynta tacliinta iyo tababarrada si loo xaqiijiyo bad baadinta Carruurta iyo k o b c i n t a awooddooda maskaxeed, xaaladaha gaarka ahna Hooyada iyo car ruurta loo siiyo tababar xirfadeed munaasib ah;

5. Ka qayb qaadashada kormeerka barnaamijyada gaar ahaaneed ee Wasaaradaha, Dawladaha iyo Hay' adaha kale ee la xiriira daryeelka Hooyada iyo Carruur ta;

6. Abaabulidda dhismaha guryaha xannaanada car ruurta iyo horumarinta kuwa hadda jira; sidoo kale abaabulidda beeraha nasashada carruurta iyo gooba ha cayaaraha;

7. Ka qayb qaadashada abuuridda xarumaha Dhallin ta Kacaanka iyo kulleejooyinka lagu xannaaneeyo car ruurta, agoonta iyo kuwa ka dhashay qoysaska saboolka ah. Sidoo kale Abuuridda iyo horumarinta xaruma ha dhaqancelinta iyo daryeelka curyaamiinta;

8. Abaabulidda bibiyotekayaal carruurta u gaar ah iyo raadinta kutub, joornaallo iyo qoraallo la mustawa ah garaadka carruurta oo u kafaala qaadaya dhaqan iyo akhlaaq toosan iyo waddaninimo suuban;

9. Ka qayb qaadashada iyo gacan ka geysashada abaabulidda iyo horumarinta xarumaha daryeelka bul shadeed ee haweenka u gaar ah;

10. Ka baaraandegidda natiijooyinka iyo go'aannada ka soo baxa Shirweynayaasha looga doodo arrimaha Hooyada iyo Carruurta. Sidoo kale dersidda barnaa mijyada iyo go'aannada Ururrada Carabta, Afrikaan ka iyo Adduunweynaha ee arrimahan ku saabsan iyo qaadidda tallaabooyinka ku habboon ee lagu xaqiiji naayo ka qayb galka Qaranka Soomaaliyeed. Shirwey nayaasha iyo Ururrada Carabta, Afrikaanka iyo Ad duunka ee Hooyada iyo Carruurta saameeya;

11. Iskuduwidda iskaashiga iyo xiriirka hay'adaha Ad duunka;

12. Ka qayb qaadashada soo uruurinta iyo qaybinta kaalmada gudaha iyo dibedda ee loo fidiyo Hooyada iyo Carruurta;

13. Dabagalka iyo qiimeynta fulinta Qorshaha loo de jiyey Daryeelka Hooyada iyo Carruurta.

Qod. 5aad

(Shirarka Golaha)

1. Goluhu waxa uu kulmayaa saddexdii biloodba mar. Guddoomiyaha Goluhu wuxuu Golaha isugu yeeri ka raa shir aan caadi ahayn, marka ay baahi degdeg ah timaaddo.
2. Fadhiga Goluhu wuxuu ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan Xubnaha intooda badan, go'aammada na waxaa lagu guddoonsanayaa cod hal dheeri ah.

Qod. 6aad

(Hawsha Xoghaynta)

Hawlaha Xoghaynta waxa ay yihiin:

a) Fulinta qorshaha iyo go'aannada siyaasadeed ee ka soo fula Golaha;

b) Xiriirinta Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee fu liya barnaamijyada ku saabsan daryeelka Hooya da iyo Carruurta;

t) U diyaarinta Golaha talooyin farsamo, daraasado iyo warbixinno la xiriira ujeeddadan;

j) Ka war haynta iyo qiimeynta mashaariicda dar yeelka hooyada iyo carruurta;

x) La socodsiinta Ururrada Bulshada iyo Dadweyna ha waxtarka iyo natiijooyinka wax ku oolka ah ee laga gaaro barnaamijyada daryeelka hooyada iyo carruur ta;

kh) Diyaarinta miisaaniyadda iyo u gudbinteeda Gola ha si loo derso, kaddibna loogu gudbiyo Hay'adaha ku shaqada leh;

d) Diyaarinta, isagoo ku shaqaynaya tilmaanta Gud doomiyaha, ajendaha shirarka Golaha;

r) Diiwaaninta doodaha fadhiyada Golaha, u gudbin ta jihooyinka ay khuseeyaan go'aannada iyo til maamaha ka soo fula Golaha iyo dabagalkooda;

s) Uruurinta iyo keydinta shuruucda, xeerarka, go

aannada iyo wareegtooyinka la xiriira daryeelka Hooyada iyo Carruurta.

Qod. 7aad
(Magacaabidda Xoghaynta)

1. Xoghayaha Xoghaynta iyo Agaasimayaasha Waax yaha Xoghaynta Barnaamijyada Hooyada iyo Carruur ta waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne.
2. Xoghayntu waxay yeelaneysaa qaab dhismeed u gaar ah, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Madaxwey ne, iyadoo la dhegeystay Golaha Wasiirrada.

Qod. 8aad

(Miisaaniyadda Golaha)

1. Goluhu wuxuu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah.
2. Miisaaniyadda ku talo galka waxaa soo diyaariney sa Xoghaynta, waxaana la soo hordhigayaa Shirka Go laha si uu u oggolaado, kaddibna loogu gudbiyo Hay' adaha ku shaqada leh.

3. Xisaabaadka Golaha waxaa lagu dhaqayaa Shuruu cda iyo Xeerarka Maamulka xisaabaadka ee Hay'adaha Qaranka.

Qod. 9aad
(Xeer-nidaamiye)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay Golaha Wasiirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer-hoosaad dhammeystiraya Sharcigan, nidaamiyana habka hawlqabadka waaxya ha iyo qaybaha kala duwan ee Maamulka Golaha.

Qod. 10aad
(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii xo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI lambar 23 taariikh 24 Juunyo 1984, U rogid sharci, Xeer-sharci lambar 4 ee 18ka Maajo 1984, kuna ṣaabsanaa dib u habeynta Sharci lambar 4, taariikh 13ka Abriile 1983: Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer-sharci lambar 4 ee 18ka Maajo 1984: dib u habeynta Sharciga lambar 4 ee 13ka Abriile 1983 kuna saabsan joojinta Qaadka.

Qod. 2aad

Sharligan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kad dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI lambar 24 taariikh 24 Juunyo 1984, U rogid sharci Xeer-sharci lambar 6 ee 18ka Maajo 1984, kuna saabsanaa Baabi inta Wakaaladda Horuma rinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtadada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka-sharci lambar 6 ee 18ka Maajo 1984: Baabi'inta Wakaaladda Horuma rinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI lambar 25 taariikh 24 Juunyo 1984, U rogid sharci, Xeer Sharci lambar 5 ee 18ka Maajo 1984: Dembiyada mukhaadaraadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci Xeerka Sharci lambar 5 ee 18ka Maajo 1984, kuna saabsan dembiyada mukhaa daraadka.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH.

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Maxamed Axmed uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikh du ahayd 25-8-79 uu ku weydiistay gabal dhul Dawlad eed ah oo ku yaal Muqdisho Deg- Yaaq Shiid Qaabkii suna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Maxamed Cabdi
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed Waxaa ka xiga: Cali Nuur
B a r i Waxaa ka xiga: Cusmaan Cali

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 183

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Maxamed Siyaad-uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 5.4.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wawl—Wadaag Qaabkiisuna ya hay far Gees Addimihiisuna yihiin 13.50X13.50 kuna fadhiya 131,25 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Maxamed Cabdi

Galbeed Waxaa ka xiga: Maxamed Xasan

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 184

# WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,
# NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ismaaciil Cabdi Xaad uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd —— uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna ya hay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 120X45 kuna fadhiya 5.400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Wáqcoyi Waxaa ka xiga: War/da Ogsojinka.

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Badar Qaasim.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Warshadda

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 185

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,
## NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdul le Jimcaale u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmi ga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taa riikhdu ahayd 2.4.82 uu ku weydiistay gabal dhul Daw ladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. W/Wadaag Qaab kiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 13.50 X27 kuna fadhiya 464.50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: dhulka Xasan Xersi

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddada H/Wadaag

B a r i Waxaa ka xiga: dhul Diiriye Axmed Rooble

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 186

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Guure Cali uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Da wladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 9.3.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Trabesi yo Addimihiisuna yahiin 12.70X17.10 kuna fadhiya 217.17 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: W.C. Qalabka Sida

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddada Qaranka

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo yar

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 187

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cabdi Xa san uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 27.3.82 ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fa dhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
Galbeed Waxaa ka xiga: W. Maxamuud Xarbi
B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Abr. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 188

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Warshadda Gaas ka Soomaaliyeed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawladda Hoose ee Muqdisho, maalin tii taariikhdu ahayd 20.11.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 85X100 kuna fadhiya 9500 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 28. Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 189

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO, WAAXDA DHULKA RASMIGA AH NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Saciid uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 25.5.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Shibis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 12X18 kuna fadhi ya 216 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wux si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee Dawladda Hoose Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 191

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Hilowle Axmed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikh du ahayd 23.4.81 uu ku weydiistay gabal dhul dawlad eed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisu na yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 15X15,50 ku na fadhiya 292,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo 20 mt.
Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 35 B.
B a r i Waxaa ka xiga; Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 191/bis

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saynab Maxamed Cumar uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 15.11,80 uu ku weydiistay gabal dhul dawlad eed oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkiisuna ya hay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fa dhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 24 W,

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 72 W,

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 82 W,

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 192

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaawo Nuúr Cismaan uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 11.3,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,56 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Xaaji Cusmaan

Galbeed Waxaa ka xiga: Jidka 26 Jun.

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 193

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xuseen X. Xasan uu u soo qortay arjji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aha yd 8.6,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg, Kaaraan Qaabkiisuna yahay Afar Gees Isla'eg Addimihiisuna yihiin 12X12 kuna fadhiya 144 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri dad leeyahay

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 11Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 194

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Cismaan Gu rey u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aha yd 13,7,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X26 kuna fadhiya. 480 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Yuusuf Cismaan Gurey

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 11Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 195

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa ka xaddeynayaa in J/le Cali Shariif Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 8,6,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Elle Addimihiisuna yihiin (24X12)+6X12 kuna fadhiya 360 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo & Guri dad lee.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddada Kaaraan

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddada Sanca

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 11Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 196

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
# WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Yuusuf Cismaan Gurey uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3,7,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 24X20 kuna fadhi ya 480 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Cabdi Cismaan Gurey

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Bender Qaasim

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar . waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 11Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le X, Y suf Cismaan Culusow uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 25,2,82 uu ku weydiistay gabal dhul dawlad eed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Cabdulcasiis Qaabkii suna yahay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin (26+7)X40 kuna fadhiya 660 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 11Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L.198

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH·

BEDDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Dhulkii uu soo weydiis tay J/le Maxamed Xasan Cali maalintii taariikhdu aha yd 27,4,77 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg· Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ah aayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh· Loona qaaday dan Guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Deg· Kaaraan sidaa awgeed hore loogu soo diray lambarkeedu ahaa WHG/3,23,471 ee 26,5,77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku Tilmaaman·—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg· Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam· 259 B,

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam· 252 B,

Muqdisho, 7,12,82·—

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D· HOOSE

Jeom· Maxamuud Cabdi Cismaan

L· 199

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH.

BEDDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiis tay Jaalle Hindiya Xaaji Xuseen maalintii taariikhdu ahayd 28,5,77 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihii suna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh. Loona qaaday dan G d awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naada dii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa ——— oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH. —

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 239 B,

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 238 B,

Muqdisho, 7,12,82.—
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D. HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 200

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH.

BEDDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiis tay J/le Khadiija Saalax Cabdalla maalintii taariikhdu ahayd 12,7,75 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihii suna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh. Looga qaaday dan Guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naada dii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa——— oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH. —

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Looto Lam. 270 B,

Koonfur Waxaa ka xiga: Looto Lam. 274 B,

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 276 B,

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 11 Dic. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D. HOOSE

Jaam. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 201

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 061508 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iskalahaa Cabdirisaaq Guuleed Jaamac sida ku cad warqadda lambarkeedu ——— taariikhdu 11.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg lam. 061508 oo ku qoran Cabdirisaaq Guuleed Jaamac ayna ku jirto Sh.So. 20.000 (Labaatan Kun).

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad u badalo Cabdirisaaq Guuleed Jaamac ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.84

GUDDDOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 204

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 061509 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iskalahaa Cabdirisaaq Guuleed Jaamac sida ku cad warqadda lambarkeedu ——— taariikhdu 11.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. ... sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU ... ERIYEY

In labaabi'iyo ... mento) Jeeg lam. 061509 oo ku qoran Cabd... leed Jaamac ayna ku jir to Sh.So. 20.000 (La... ...an).

WUXUU ... AAYAAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad u badalo Cabdirisaaq Guuleed Jaamac Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka ya rayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.84

GUDDDOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 205

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 681573 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley ku na qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iskalahaa Ma xamed Xasan Yuusuf sida ku cad warqadda lam barkeedu 329 taariikhdu 11.7.84 ee Bangiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiig ley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXNU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento Jeeg lam. 681573 oo ku qoran Aadan Xasan Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 20.000 (Labaatan Kun).

WUXUU FARAAYAAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley u badalo Aadan Xasan Yuusuf Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka ya rayn 15 maaloom maalinta Go'aanka lagu daabaco Faa linta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 206

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lam barkiisu ahaa 074121 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Gaydka Soomaaliyeed Laanta Jaw har kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu is kalahaa Daahir Calosow Hiraabe sida ku [illegible] war qadda lambarkeedu 007900 taariikhdeedu 14.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jawhar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9 65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. [illegible]74121 oo ku qoran Daahir Calasow Hiraabe ayna ku [illegible]to Sh.So. 50.000/=.

WUXUU LARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jawhar u badalo J. Wareega ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mi dah kadib markay ka soo wareegto muddo 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga a hee JDS. haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.7.84

GUDDDOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 207

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDU UARKAY: In J. ... ega dhumay oo lambar kiisu ahaa 074122 lag ... o saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka ... yeed Laanta Jawhar kuna qoran lacag dh ... 50.000/= uu iskala haa Daahir Calasow ... a ku cad warqad da lambarkeedu 0079 ... u 14-7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Ka ... oomaaliyeed Laanta Jawhar;

HADDU UARKAY: Qod: ... harciga lam. 2 ee 9:9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 074122 oo ku qoran Daahir Calasow Hiraabe ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jawhar u badalo Jeegga aWreega ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin:

Muqdisho, 14:7.84

GUDDDOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 208

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambar kiisu ahaa 23877 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta ku na qoran lacag dhan Sh.So. 152 540.00 uu iskalahaa Sahra Yuusuf Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 23877 taariikhdeedu 9.7.84, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam 23877 oo ku qoran magaca Sahra Yuusuf Axmed ayna ku jirto Sh.So. 152.540.00.

WUXUU XEERAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Buugga Kaydka ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid a hkadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 39 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 9.7.84

GUDDDOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 209

MAXKAMADDA GOBOLKA W G/HARGEYSA

UJEEDDO:- DEGEREETO CUSBOONEYSIIN JEEGA DHUMAY EE WAREEGA LAM· YAHAY 651226 EE Lacagtiisuna tahay 50,000/= Sh.So.

GUDDOOMIYAHA MAX. G.W/GALBEED HARGEYSA

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Barkhadle Cumar, kuna taariikheysan 8dii Maajo, 1984ka, kuna codsaday in loo Cusboonaysiiyo Jeegga Wareega Lambarkiisu kor ku xusan yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa, kuna taariikheysan 10 5.84 oo lagu caddeeyey in 14kii Janaayo 1984ka laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco, isla markaasna laga faafiyey Laanta Hargeysa, 6dii Maajo, 1984ka lagana sameeyey magaca Cabdillaahi Cali Maxamed;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeeggii lumay loona Cusbooneysiiyo Jaallaha Magaciisa la yidhaahdo Axmed Barkhadle Cumar, cusboonaysiintana Gacanta laga saaro Jaallaha kor ku qoran. Ama ciddii awood ka haysata muddo 15 Maalmood gudahood ah, kadib maalinta Go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga iridiisa si ciddii haysata Jeeggii lumay ee kor lagu kansal gareeyey ugu soo qortaan Cabasho, haddii ay doonaan.

Hargeysa, 9.6.84

GUDDOO. MAX. G.W.G.HARGEYSA
(Ibraahim Faarax Maxamed)

KAALIYAHA MAX.G.W.G.HARGEYSA
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. dhumay oo lambar kiisu ahaa 120236 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska haa Jaalle Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu 0000936 taariikhdu 17.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 120236 oo ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed ay na ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 209

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambar kiisu ahaa 714925 lagana soo saaray · Bang ga Ga nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50·000/= uu iskaia naa Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqad da lambarkeedu 0000936 taariikhdu 17·7.84 ee Ba..

giga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod· 69 sharciga lam. 2 ee 9·9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam, 714925 oo ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed ayna ku jirto Sh,So 50, 000

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maa lin.a Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18·7.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 210

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War dhumay oo lambar kiisu ahaa 13250 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad ku na qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iskalahaa Jaalle Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu 0493 taariikhdu 17.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 13250 oo ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Koowaad u badalo Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 211

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 13249 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu 1493 taariikhdu 17.7.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIY)Y

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 13249 oo ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Woowaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku t lmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ( ) JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 212

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J W Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 4169 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Muuse Warsame Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu 0001695 taariikhdeedu 17.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

### WUXUU XEERIYEY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed 4169 oo ku qoran magaca Muuse Warsame Xasan ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

### WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Jeegaa ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah laga keenin.

Muqdisho 17.7.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR
Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBO A BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J W Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 13018 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qoran lacag dhan Sh So 100,000 uu iska lahaa Muuse Warsame Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu 0484 taariikhdeedu 14 7 84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad

HADDUU ARKAY: Qod, 69 sharciga lam 2 ee 9 9 65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War, Lambr 13018 oo ku qoran Muuse Warsame Xasan ayna ku jir to Sh So 100,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 13018 u bedelo Muuse Warsame Xasan ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J D S Haddii inta ka horaysa aan wax i hortaag ah laga keenin,—

Muqdisho 16 7 84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Max

L 214

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J W Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 17841 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad kuna qoran lacag dhan Sh So 100'000 uu iska lahaa Muuse War same Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— taariikhdeedu 14 7 84 ee Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad

HADDUU ARKAY: Qod sharciga Lam 2 ee 9 9 65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War, Lambr 17841 oo ku qoran magaca Muuse Warsame Xasan ay na ku jirto Sh So 100,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 17841 u bedelo Muuse Warsame Xasan ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalm ood maalinta Go aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Had dii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin

Muqdisho 16 7 84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L 215

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J W Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 648675 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta B/Weyne kuna qoran lacag dhan Sh So 50'000 uu iska lahaa Jaalle Haashim Sheekh Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu 08159 taariikhdeedu ——— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L Xis gud

HADDUU ARKAY: Qod sharciga Lam 2 ee 9 9 65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War, Lambr 648675 oo ku qoran magaca Haashim Sheekh Axmed ayna ku jirto Sh So 50,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta B/Weyne u bedelo Jeega Wareega ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Haddii in ta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin

Muqdisho 19 7 84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L 216

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B, K, Dhumay oo lambarkiisu ahaa 7450 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh So 175-121 uu iska lahaa Faaduma Maxamed Macallin sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeedu 19 6 84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam 7450 oo ku qoran magaca Faaduma Maxamed Macallin ayna ku jirto Sh So 175-121

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad u bedelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta Rasmiga ah ee J D S Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 23 6 84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L 2418

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:
HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu
ahaa 24152 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh,So, 190-831 uu iska lahaa Macaaney Yuusuf Cilmi sidaa ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0031597 taariikhdeedu 10,7,84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. X/ta,

HADDUU ARKAY: Qod, 69 shareciga lam 2 ee 9 9 65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam 24152 oo ku qoran magaca Macaaney Yuusuf Cilmi ayna ku jirto Sh So 190-031

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta Rasmiga ah ee J D S Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho 19 7 84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L 202